

Degmada San Diego

Hagaha Dabaalgeda Fasaxa Jiilaalka inta lagu jiro Faafida COVID-19

Si loo yareeyo faafida COVID-19 loo xaqiijiyo in badqabaan inta lagu jiro Dabaalgeda fasaxa Jiilaalka, Degmada San Diego waxay bixinaysaa higid oo loogu talagalay waxqabayada ugu badan ee la sameeyo:

Waxqabadyada Fasaxa Jiilaalka

Lagu taliyey

- Ku adeegashada qadka onlaynka ee loogu talagalay haddiyadaha maalmaha fasaxa ama haddiyadaha kaarka, iyo waxqabadyada onlaynka.
- Munaasabadaha gaari ku adeegashada ama dhoolatus rogal celinta iyadoo uu ka qeybgalayaasha uusan ka dageyn gaarigiisa.
- Ku dir casho horey-loo-sameeyey ama maadooyinka toos qadka onlayn ka adeegyo raashiin gaarsiin oo si wadajir ah ugu cuna sheeda.
- Sadaqo waxqabadka cuntada oo ku deeq cunto meelaha cunto qeybinta iyadoo gaariga la saaran yahay, meelaha maxaliga adigoo gaariga saran ama deeq-ururinta kaydka cuntada.
- Filimada loogu talagalay habeenada maalmaha-fasaxa ama mawduuca-jiilaalka ee aad reerkaaga la qaadaneyso.
- Qaado talaalka hargabka si aad uga hortagto una yareeyso caqabadaha kaaga imanaya fayraska hargabka ama COVID-19.

Aan Lagu Talinin

- Xarumo [kasta loogu talagalay Xakameynta iyo Kahortaga Cudurada \(CDC\) tixgelinta socdaalka](#), socdaalka waxa uu kordhiyaa fursada uu COVID-19 ku kordhayo kuna faafayo. Guriga oo la joogo ayaa ah sida ugu wanaagsan aad uga hortagi karto naftaada iyo dadka kale.

Lama Oggola

- Kulammada xubnaha qoysaska kale waa mamnuuc haddii aan si cad loogu oggolaan Amarka Guri-jooga ee Maamulka Gobolku.
- Meerijaanada, dabaalgeda iyo baashaalka tooska ah lama oggola sababtoo ah isdhexgalka aadka isugu dhow wuxuu siyaadiyaa halista caabuqa.
- Kabaha barafka loogu carrao lama oggola waayo waxay soo dhoweynayaan marti badan oo ka kala yimaada reero kala duwan halkaasoo ay adag tahay ku adkeysiga ugu yaraan 6dhudhun.

Si kaloo Ka badbaado roon

Waxqabadyada fasaxa jiilaalka oo badanayaa wuxuu noqon karaa halista faafida fayraska oo sarreysa. Waxaajira siyaabo kale oo ka badbaado roon oo lagu dabaaldegoo waxayna isugu jiraan sidan soo socota:

- Cayaaro iyo waxqabadyo kala fog si loogu bedelo baashaalka dhaqanka ee shaqsiga ah.
- Ku kaxeeynta xubnaha reerkaaga aad gaarigaaga kukaxeeyso si ay u soo daawadaan nalalka iyo qurxinta maalmaha fasaxa.
- Ka qeybgal orodka, baaskiil wadista, ama mooto wadista loogu talagalay fasaxa maalmaha jiilaalka ama sheeda mawduuca fasaxa.
- Booqo Santa, ama goobaha kale ee fasaxa ee ku yaala meelaha bixiya keliya waayo-aragnimo.
- Hadiyado isdhaafsiga aalada muuqaalka, halkaasoo kasoo qeybgalayaasha ay raaci karaan tallaabooyinka kahortaga ee xilliga hore siinta iyo aqbalaada haddiyadaha si kala fogaan leh.

Tallaabooyinka Kahortaga Shaqsiyanka ah

Si kasta aad ugu dabaaldegeyso, fadlan sii wad inaad raacdo Amarka Maamulka ee Guri-jooga, [amarka Caafimaadka Dadweynaha Degmada San Diego](#), [Waaxda CDPH Hagaha Maalmaha Fasaxa Caafimaadka Dadweynaha California](#), iyo Hagaha [Maalmaha fasaxa CDC](#). Si loo badbaado inta lagu jiro xilliga fasaxa jiilaalka 2020, fadlan xusuusnow inaad:

- Dhaqdo ama jeermistirto gacmahaaga badanaa, oo si joogto ah u nadiifi walxaha la taabto markasta.
- Ka fogow isudhowaanshaha ka joog ugu yaraan 6 dhudhun in u jirta dadka kale oo aan qeyb ka aheyn qoyskaaga.
- Ka fogow meelaha guddaha ah oo aan kuu oggolaaneen kala fogaansho fudud oo ugu yaraan dhan 6 dhudhun oo u dhexeysa [adiga iyo dadka kale](#).
- Si saxahu xiro [weji dabool munaasab ah](#) oo daboolaya afkaaga iyo sanakaaga markaad joogto meel banaanka ka ah gurigaaga dad kale joogaan oo aan reerkaaga aheyn.
- Gurigaaga joog oo dadka kale ka fogow haddaad xanuunsan tahay, aad qabto calaamadaha COVID-19, ama aad la xiriirtay qof la jiran ama qaba calaamadaha COVID-19.
- Raac tilmaamaha haddii laguugu taliyo inaad [isgo'doomiso ama aad iskarantiisho](#).

Wixii su'aalo ah, [fadlan](#) la xiriir SafeReopeningComplianceTeam@sdcounty.ca.gov.



La casriyeeyey 12-9-2020

www.coronavirus-sd.com

